Joogteeya akhrinta Qur'aanka, Allaha nafta Maxamed Gacantiisa ku jirtaan ku dhaartaye wuxuu ka siibasho badan yahay Qur'aanku Geel dabaran

Abii Muusa Alashcari Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey, in Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: "Joogteeya akhrinta Qur'aanka, Allaha nafta Maxamed Gacantiisa ku jirtaan ku dhaartaye wuxuu ka siibasho badan yahay Qur'aanku Geel dabaran".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu amray in la joogteeyo akhrinta Qur'aanka iyo in si xiriira loo akhriyo, si aan Qofka laabta ku xifdisani u ilaawin, wuxuuna Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ku adkeeyey inuu ku dhaartay in Qur'aanku laabta kaga baxsan og yahay si ka daran geel la dabray oo xarig dhudhunka looga xiray, hadii Qofku ilaaliyo wuu soo qaban hadiise uu iska daayo wuu tagin oo lumin.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/5907